

1. **Shaybaadhka/Labaratooriga:** Goobo ama wareeg gali baadhitaanka la amray

2. **Bukaanka:**

- Ku qor magacaaga, taariikhda iyo wakhtiga ururinta weel kasta
- Ku rid saxarada la qaadayo weel nadiif ah oo engegan. Waxa la isticmaali karaa weel u ka dhamaaday subagga maargarine, jalxad ama ashuun yar oo nadiif ah oo af balaadhan, ama weelka aluuminyamka ah ee lagu sameeyo keegga/doolshaha. Waxa kale oo la isticmaali karaa gobol ama qayb ah jawaan ka sameysan 'saran' oo la hoos dhigo saxanka godka musqusha si loo ururiyo saxarada. Saxarada HA KU ridin biyaha godka musqusha, ama si toos ah ha ugu ridin weelka lagu ururinayo. Caruurta aan musqusha isticmaalkeeda baran, waxa la sameyn karaa dheebarka ayaa qaybta gudaha ah dibadda loo soo saari karaa ama la geddin karaa, ama waxa la dul saari karaa in ah jawaan 'saran'. Waa inaan saxarada laga soo xoqin dusha qoyaanka nuugta ee dheebar.

Magaca Baadhitaanka	Baadhitaan #/Fure	Weel	Faallo
Abuurka Saxarada (Abuurka Saxarada (Feces Culture), Cudur-keenayaal: Salmonella, Shigella, E.coli O157:H7, Aeromonas, Plesiomonas, Campylobacter)	6562/STL	Quraaradda/qarshada abuurka ee Cary Blair	Ku dar saxarada ilaa laynka aad ka gaadhsiisid ka dibna si wacan u walaaq. Ururinta ka dib gali qaboojiyaha kuna soo celi gudaha 72 saacadood. Maalintii qaad kaliya hal qayb oo saxaro ah. Fiiro: Waxa lagu talinayaa in la qaado 2-3 qaybood oo lagu riday quraarado/ qarshooyin gooni ah maalmo kala duwan.
WBCs, PMNs (‘Leukocytes’ saxarada Saxarada laga eegayo unugyo cadcad, Midabeyn saxaro (Stool gram stain))	6608/WBS	Weel nadiif ah, <u>Ma jiro weel qaadis oo gaar ah</u>	Qaboojiyaha gali soo na celi gudaha 24 saacadood.
Ukunta iyo Gooryaanka (Ova and Parasites) (O&P)	6596/OP	Laba quraaradood/qarsho - Formalin - PVA	Ku dar saxarada ilaa laynka aad ka gaadhsiisid ka dibna si wacan u walaaq. Ha qaboojin ee kulkiisu ha ahaado ka qolka ama guriga. Ma jiro wakhti u go’an in lagu soo celiyo shaybaadhka ama labaratooriga. Maalintii qaad kaliya hal qayb oo saxaro ah. Fiiro: Waxa lagu taliyay in la qaado saddex qaybood oo laga baadhayo gooryaan, kuwaasoo qaadistooda ay u dhexeyso laba cisho, laguna qaaday 2 quraaradood.
Giardia antigen	6695/GIA	Quraarad/qarsho Formalin	Ku dar saxarada ilaa laynka aad ka gaadhsiisid ka dibna si wacan u walaaq. Ha qaboojin ee kulkiisu ha ahaado ka qolka ama guriga kuna soo celi gudaha 2 bilood.
Clostridium difficile Toxin A/B	6588/CDT	Weel nadiif ah, <u>Ma jiro weel qaadis oo gaar ah.</u>	Ururinta ka dib gali qaboojiyaha kuna soo celi gudaha 72 saacadood. (Waxa ugu fiican gudaha 24 saacadood).
Abuurka Yersinia	6534/YER	Quraaradda/qarshada abuurka ee Cary Blair	Ku dar saxarada ilaa laynka aad ka gaadhsiisid ka dibna si wacan u walaaq. Ururinta ka dib gali qaboojiyaha kuna soo

celi gudaha 72 saacadood.

Abuurka Vibrio	6536/VIB	Quraaradda/qarshada abuurka ee Cary Blair	Ku dar saxarada ilaa laynka aad ka gaadhsiisid ka dibna si wacan u walaaq. Ururinta ka dib gali qaboojiyaha kuna soo celi gudaha 72 saacadood.
Baadhitaanka Cryptosporidium	6542/CRY	Quraarad/qarsho Formalin	Ku dar saxarada ilaa laynka aad ka gaadhsiisid ka dibna si wacan u walaaq. Ha qaboojin ee kulkiisu ha ahaado ka qolka ama guriga kuna soo celi gudaha 2 bilood.
Rotavirus Antigen, Saxaro	5780/ROV	Weel nadiif ah	Ururinta ka dib gali qaboojiyaha kuna soo celi gudaha 72 saacadood.
